TIPS FOR PARENTS

Support Programs for Struggling Students

Barnaamijyada lagu caawiyo ardayda ku liidato waxbarashada

Mararka qaar, ardayda way ku liidan karaan waxbarashada. Qaarkood si loo caawiyo waxay u baahanyihiin barnaamijyo Gaar ah, qaarkoodna waxay u baahanyihiin wax yar oo caawinaad ah si ay u guuleystaan.

Waxaa iskuulaadka Toronto ka jira barnaamijyo fara badan oo lagu caawiyo ardayda waxbarashada ku liidato.

Wax ka Qabadka Hore (Xanaanada)

Ardayda haddii ay helaan taakuleyn fiican marka hore, ma dhacdo badanaa in ay u baahdaan barnaamij lagu caawiyo sanad dugsiyeedkooda dambe. Toronto waxaa ka dhisan laba Guddoon Waxbarasho oo luqadda Ingiriisiga wax lagu barto – Guddoonka Waxbarashada Dugsiyada Toronto (TDSB) iyo Guddoonka Waxbarashada Dugsiyada Masiixiga ah ee Toronto (TCDSB).

Labada guddoonba waxay ardayda dugsiyada xanaanada dhigata oo ku liidato waxbarashada u fidiyaan barnaamijyo taakuleyn ah.

Barnaamijka Taakuleynta Ardayda Xanaanada dhigata ee (TDSB) iyo **Barnaamijka Taakuleynta Ardayda Xanaanada** dhigata iyo **Baahidooda (KIND)** ee (TCDSB) waxaa loogu tala galay ardayda ku liidato waxbarashada. Barnaamijyadan waxay fidiyaan taakuleyn saa'id ah ayadoo lala soconaayo ardayda waxbarashadooda, horumarinta aqoontooda dhinaca bulshada iyo xoojinta waxbarashadooda.

Barnaamijka Wax ka Qabadka Hore ee Barashada Luqadda ardayda dhigata **Xanaanada (KELI)** ee (TDSB) iyo **Barnaamijka Barashada Luqadda** ee ardayda dhigata **Xanaanada** ee (TCDSB) waxaa lagu fidiyaa taakuleyn badan oo ku aadan barashada luqadda iyo qoraalka waxaana loo fidiyaa ardayda Roo-roon ee dhigata dugsiga Xanaanada kuwaas oo ka gaabiyo dhinaca hadalka. Ardayda waxay ka qebgalaan fasaladooda caadiga ah ee Xanaanada, haddana usbuucii laba maalin nuskood ayey ka sii qeybgalaan barnaamijka waxbarashada luqadda. Barnaamijkan waxaa bixiya ruux macallin ah iyo ruux ku takhasusay hadalka iyo ku dhawaaqidiisa.

Macallinka xanaanada dhiga ayaa kuu soo sheegi doono haddii canuggaada uu u baahanyahay barnaamijkan iyo in kale.

Labada guddoonba waxay qabaan **Xarumo Waalidka iyo Qoyskaba** wax ay ku bartaan iyo meel caruurta hadda dhalatay ilaa lix jir ah lagu sii hayo inta waalidka uu mashquulsanyahay. Barnaamijkan waxaa fidiya macallimiin takhasus u leh xirfadda xanaanada waalidka iyo caruurtooda, waxayna dadka baraan qoraalka iyo akhrinta luqadda, xitaa waxay fidiyaan adeega baaritaanka aragtida indhaha iyo maqalka dhegaha. Si aad u ogaato xarunta kuu dhow fiiri shabakadda TCDSB oo ah: *http://www.tcdsb.org/parents/parentingcentres.htm* ama midda TDSB oo ah: *http://www.tdsb.on.ca/parents/parenting_and_family_literacy/finder.asp*

Barnaamijyada Ardayda dhigata Dugsiga Hoose/dhexe

Iskuuladka badankood waxay bixiyaan barnaamijyo fara badan oo lagu taageero ardayda dhigata dugsiga hoose/dhexe ee ku liidato waxbarashada. Barnamijyadaan waxaa ka mid ah kuwa hoos ku qoran. Waydii maamulaha barnaamijyada iskuulkaada uu bixiyo.

Barnaamijka wax ka Qabadka Hore ee Barashada Akhrinta, oo laga bixiyo iskuulaadka TDSB qaarkood wuxuu caawiyaa ardayda dhigata fasalka 1 oo ku liita akhrinta luqadda. Arday jaamacadaha dhigata ayaa iskaa wax u qabso ku baro ardaydan si loo kobcciyo wax akhrintooda ayadoo macallimiinta fasalkana ay kormeerayaan.

Guddoonka TCDSB wuxuu caawiyaa ardayda dhigata fasallada 4aad iyo 5aad wuxuuna u fidiyaa **Barnaamijka Waxbarashada Akhrinta iyo Qoraalka ardayda Roo-roon** kaas oo loo maro barnaamijka ku magacaaban **Barnaamijka wax ka Qabadka Hore ee Barashada Akhrinta iyo Qoraalka ee ardayda Roo-roon**, waa barnaamij gaaban oo haddana si boobsiis ah kor loogu qaado xirfadda akhrinta ardayda. Ardayda waxay la fadhiistaan macallinka ayagoo koox-koox tiro yar ah, waxaana la siiyaa casharro iyo xeelad ay ku bartaan wax akhrinta.

Barnaamijka **Macallimiinta ardayda Fasalka Taageerta,** oo ay ka wada qeybqaataan Guddoonka Waxbarashada Toronto iyo Xafiiska Waxbarashada Akhrinta iyo Qoraalka ee gobolka Ontario, wuxuu ku taageeraa ardayda dugsiyada hoose/dhexe dhigata macallimiin taageerayaal ah oo lagactooda ay qolyahaasi bixiyaan (macallimiintaani waa arday jaamacadaha ama kolleejooyinka si buuxda u dhigta) si ay u caawiyaan ardayda liidata.

Taakuleynta Barashada Akhrinta, Qoraalka iyo Xisaabta

Qeybta Horumarinta Waxbarashada ee TDSB waxay fasalada dugsiga kaddib fidisaa barnaamij ku saabsan barashada akhrinta, qoraalka iyo xisaabta oo la siiyo ardayda dhigata fasallada 7aad ilaa 12aad. Ardayda waxay ka shaqeeyaan sidii

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario
toronto community foundation

Support Programs for Struggling Students

ay ugu guuleysan lahaayeen maadooyinka fasallada laga dhigto. Haddii aad rabtid faah-faahin dheerad ah, la xiriir Qeybtaas oo telefoonkeeda yahay 416-338-4333, ama emailka *coned@tdsb.on.ca.*

Duruusta la qaato xilliyada Kuleelaha

Labada Guddoonba waxay ardayda dhigata fasallada 7aad iyo 8aadba oo ku liidato wax akhrinta ama xisaabta u fidiyaan barnaamijyo waxbarasho xilliga kuleelaha ah. Haddii aad rabtid faah-faahin dheeraad ah, la xiriir qebta horumarinta waxbarashada. Guddoonka TCDSB, kala xiriir shabakadda *http://www.tcdsb.org/continuinged/summerschool/elementary/gr78.htm.* Guddoonka TDSB kala xiriir shabakadda *www.InTheZone.ca,* ama telefoonka 416-338-4333, ama emailka *coned@tdsb.on.ca.*

U Gudbidda Dugsiga Sare

Iskuulaadka qaarkood waxay ardayda u fidiyaan barnaamijo ku hagaayo sida ay u bilaabi lahaayeen dugsiga sare. Barnaamijyadaan waxay u sahliyaan ardayda sida ay u fahmi lahaayeen nolosha dugsiga sare waxaana la bixiyaa usbuuca ka horeeyo inta aan iskuulka la furin bisha Sebteembar. Guddoonada waxbarashada Toronto labaduba waxay ardayda dhibaateysan oo halista ugu jirta in ay iskuulka iska joojiyaan u fidiyaan gar gaar saa'id ah si ay ugu sahliyaan bilaabidda dugsiga sare.

Dugsiga Sare

Barnaamijka Horumarinta Ardayga

Iskuul kasta wuxuu leeyahay Barnaamijka Horumarinta Ardayga oo lagu taageero ardayda dhibaatada waxbarashada qabto ama u baahan taageero saa'id ah si ay u qalin jebiyaan. Ardayda waxay si toos ah ugu tagaan Macallinka Horumarinta Ardayga, waxay helaan qof ay kala hadlaan dhibaatadooda gaarka ah, waxayna gartaan fursadaha kala duwan ee u furan. Lataliyaha ama ku-xigaha maamulaha iskuulka ayaa ku siin kara faah-faahin ku saabsan sida aad ugu heli lahayd canuggaaga Barnaamijka Horumarinta Ardayga.

Iskuulaadka la dhigto xilliga Kuleelaha ah ama Habeenkii

Ardayda dugsiga sare dhigata oo ku guuleysan wayso in ay ka qalin jebiyaan duruusta qaarkood, waxay duruustan ka qaadan karaan iskuulaadka la dhigo xilliyada kuleelaha ama habeenkii. Waxay kaloo ardaydan duruustan ka qaadan karaan khadka internetka. Haddii aad rabto faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan duruusta iyo barnaamijyada la heli karo kala xiriir xafiiska qeybta latalinta ardayda ama la xiriir Qeybta Horumarinta Waxbarashada ee TDSB telefoonkooduna yahay 416-338-4222 ama emailkooda ah *coned@tdsb.on.ca.* Halka aad kala xiriiri kartid Qyebta Horumarinta Waxbarashada ee guddoonka waxbarashada TCDSB waa 416-222-8282 ext 2675 ama shabakaddooda internetka oo ah: *http://www.tcdsb.org/continuinged/.*

Dib u sameynta Dhibcicii imtixaanka ee lagu guuleysan waayey iyo Soo Badbaadinta Dhibcaha

Barnaamijka Dib u sameynta Dhibcaha waxay fursad u siineysaa ardayga in uu ku guuleysto dhibcihii maadada oo uu horey ugu dhacay. Barnaamijkan waxaa loogu tala galay in ardayga laga caawiyo maadada ay dhibaatada ka hayso. Barnaamijka *Ka Hortagga Dibcaha Lumi kara* waa xeelad lagu caawiyo ardayga dhibaatada qaba asagoo ku jira fasalkiisa waxaana loo fidiyaa taageero fara badan waana lala socdaa had iyo jeer horumarkiisa waxbarashada. Barnaamijka *Soo Badbaadinta Dhibcaha* waa barnaamij lagu fulin karo fasalka dhexdiisa ama dibaddiisaba (ardayga fasalka ayaa laga soo saarayaa) si ardayga loo siiyo taageero fara badan inta uu imtixaanka maadadaas ku mashquulsanyahay. Haddii aad rabto faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyadan kala xiriir Iskuulkaada

Duruusta laga barto Shabakadda Internetka

Waxaa hadda diyaar ah in ka badan 50 nooc oo duruus ah oo uu ardayga ka baran karo internetka. Duruustan waxaa soo diyaariyey hadhowdina saxayo imtixaanka macallimiin ku takhasustay maadada. Habkan wuxuu ardayga u suuro gelinayaa in uu gurigiisa ama iskuulka uu wax ku barto wuxuuna fursad u helayaa in uu qabsado dantiisa kale. Haddii aad rabtid faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan duruusta laga barto shabakadda internedka, kala xiriir gudoonka waxbarashada TDSB telefoonka 416-396-8481 ama emailka ah *virtualschool@vs.tdsb.on.ca.*

Guddoonka waxbarashada TCDSB ka fiiri *http://www.tcdsb.org/eclass/* ama emailka *eregister@tcdsb.org*

Shaqaalaha Caruurta iyo Dhallinyarada

Guddoonada waxbarashada iskuulaadka Toronto waxay labaduba leeyihiin Shaqaale u tababaran adeega Caruurta iyo Dhallinyarada oo caawiya ardayda. Waxaa dhici karta in ay hal iskuul wada joogaan ama la wacan karo. Shaqaalaha Caruurta iyo Dhallinyarada waxay u taageeraan ardayda mid mid, ama koox koox si ay ardayda uga gudbaan dhibaatada ka haysata dhinaca bulshada, niyadda iyo dad la dhaqanka.

Faah-faahin dheeraad ah kala xiriir:

Guddoonka Waxbarashada Dugsiyada Toronto: *www.tdsb.on.ca*
Guddoonka Waxbarashada Dugsiyada Masiixiga ee Toronto: *www.tcdsb.org*
Wasaaradda Waxbarashada: **www.edu.gov.on.ca**
People for Education: *www.peopleforeducation.com*

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*